



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Janaayo 11, 2021

Ku socota: Qoysaska carruurta helaysa adeegyada ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Taageerada Qoyska Inta lagu jiro COVID-19

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS) wuxuu aqoonsan yahay taageerada muhiimka ah ee waalidiinta iyo xubnaha ka tirsan qoysku maalin kasta bixiyaan si carruurtooda qabtaa naafanimada maskaxda ama korriinka uga dhigaan in ay caafimaad iyo ammaan ku joogaan guriga. Cudurka baahsan ee COVID-19 ayaa sababay in carruurta qaarkood ee qaba baahiyo sare aysan awoodin in ay helaan daryeel bixiyayaasha adeega guriga dhexdiisa, iyada oo waalidiinta iyo xubnaha ka tirsan qoysku ay buuxinayaan hawsha bannaan.

Waxay ka dib markii cudurka baahsan ee COVID-19 soo gaaray Oregon, ODDS waxay codsi u gudbisay Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) si lacago go'an loo siiyo waalidiinta/mas'uuliyiinta haysta carruur ka yar 18 jir ee leh baahiyaha ugu badan ee dhanka taageerada oo la taaban karo.

CMS kama aysan soo jawaabin codsigani. Taasi beddelkaada, ODDS ayaa heshay oggolaansho lagu taageerayo qoysaska haysta carruur da'doodu ka yar yahay 18 jir ee leh baahida ugu badan ee la taaban karo iyada oo waalidiinta loo oggolaanayo in ay si ku meel gaar ah taageerooyinka lacagtooda la qaato saacadii u siiyaan carruurtooda iyaga oo ah Shaqaalaha Taageerada Shaxsiyeed (PSW). ODDS ayaa filaysa in ay bixiso kala doorashadan haddii ku dhawaaqista Xaalada Caafimaad ee Degdega ah ee Bulshada (PHE) la kordhiyo waqti dhaafsiisan Janaayo 21, 2021. PHE ayaa la kordhiyay waqtiyo badan inta lagu jiro cudurka baahsan ee COVID-19,

markaa waxaa dhici karta in mar kale la kordhiyo. Waxaan hadda sameynaynaa xiriir, si ay waalidiinta leh carruur wax u qalantaa ay u bilaabi karaan warqadooda isqorista oo diyaar u noqdaan in ay sida ugu dhakhsaha badan u bilaabaan bixinta adeegyada, haddii PHE la kordhiyo Janaayo.

Kala doorashadan waxaa heli doona carruurta qabta naafanimada maskaxda iyo/ama korriinka ee leh baahiyaha ugu badan ee dhanka taageerada oo la taaban karo. Gaar ahaan, kala doorashadani waxaa heli doona oo loogu talagalay waalidiinta carruurta:

- Buuxisa shuruudaha loogu talagaay barnaamijka Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran (CIIS) oo ay ka mid yihiin barnaamiyada Caafimaad ahaan la Nugul yahay, Caafimaad ahaan Loogu lug leeyahay, iyo Hab-dhaqanka, iyo/ama;
- Looga baahan yahay 240 saacadood ama ka badan oo ah adeeg bixinta bishii taasi oo ku saleysan Qiimeynta Baahiyaha Carruurtooda (CNA) ee hadda jira.

Haddii uu ilmahaagu u qalmo barnaamijkan, isku duwahaaga adeegyada ayaa kula soo xiriiri doona isaga oo haya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kala doorashadan, macluumaad ku saabsan sida la isku qoro. Haddii waalid rabo in uu isqoro, wuxuu u baahnaan doonaa in uu dhammeystiro warqad oo buuxiyo shuruudaha aasaasiga ah oo la iskaga baahan yahay, sida ku gudbida baaritaanka taariikh dembiyeedka iyo raacida dhammaan xeerarka Oregon ee khuseeya. Shuruudahaasi waxaa ka mid ah raacida tilmaamaha ODDS ee ku saabsan bixinta taageerada lacagteeda la bixiyo inta lagu jiro waxbarashada la kala joogo meel fog.

Haddii uu ilmahaagu uusan buuxin shuruuda loogu talagalay kala doorashadani, la xiriir Isku duwaha Adeegyada ee ilmahaaga si aad ugala hadasho taageerooyinka macnaha u yeelan kara ilmahaaga si loo xaqiijiyo in uu caafimaad iyo ammaan ku joogo guriga.

Waad ku mahadsan tihiin wax kasta oo aad u sameysid ilmahaaga.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.